Aftida Fikirka Dhaladka ee Baarlamaanka

Dadka UstareeliyankaUstareeliyaanka ah waxay ka kala yimaadeen dhullal badan, waxayna ku dhaqmaan diimo badan oo waxay ku hadlaan luuqado badan. Dadka Aboriginal iyo Torres Strait Islander waa dadkii Koowaad ee Ustareeliya waxayna halkan ku noolaayeen wax ka badan 65,000 sanno. Laakiinse Dastuurka Ustareeliya ma aqoonsana xaaladooda gaarka ah. Taasi waa sababta sannadkan xaggiisa dambe, aan u awoodi doono inaan ka fekerno ku bedelaada Dastuurkeena Afti dadweyne. Dhammaan dadka Ustareeliyanka ah waxay fursad u leeyihiin ay ku aqoonsadaan xuquuqda Dadkii ugu Horeeyey, taariikhdooda iyo xiriirka joogtada ah ee ay la leeyihiin dhulkaan iyo in la hubiyo in lagala tashado shuruucda iyo qorshayaasha siyaasadeed ee saameeya iyaga.

Waa maxay Bayaanka Uluru ee Dhabta ah (Ululu Statement from the Heart)?

Bishii Maajo 2017 dhexdeeda, wax ka badan 250 dadka ah Aboriginal iyo Torres Strait Islander ayaa si dhab ah u soo saara Bayaanka Uluru. Waxay na weydiineysaa inaan u abuurno mustaqbal fiican dhammaan Ustareeliya iyo in loogu daro Codka Dadka Dhaladka ah ee Dastuurka Baarlamaanka Ustareeliya .

Waa maxay Codka Dadka Dhaladka ah ee ku aadan Baarlamaanka?

Codka Dadka Dhaladka ah ee Baarlamaanka waa si ay dadka Aboriginal iyo Torres Strait Islander ugu hagaan Dawlada wixii sharci ah iyo qorshayaasha siyaasadeed ee ku saabsan dadka Aboriginal iyo Torres Strait Islander.

Waa maxay Aftidu?

Aftidu waa marka dadka coddeynaya la weydiiyo inay ugu jawaabaan Haa ama Maya su' aal ama su' aalo. Sida kaliya ee lagu bedeli karo Dastuurka Ustareeliya waa iyadoo la marayo Afti dadweyne.

Yaa uu coddeyn kara Aftida?

Dadka diiwaangashan oo kaliya ayaa ka qaybqaadan kara Aftida. Coddeynta Aftidu waa ku waajib coddeeyayaasha diiwaangashan.

Sidee baan uga coddeeyaa Aftida dadweynaha?

Aftidu waa sida doorashooyinka oo kale. Maalinta coddeynta, waxaad tegi kartaa goobta coddeynta oo codkaagana ku dhiibo warqada coddeynta.

Sidee baa loo go' aamiyaa Aftida?

Si ay Aftidu u noqoto mid lagu guuleyso, waxay u baahan tahay laba meelood inta ugu badan. Tan micnaheedu waxaa weeye coddadka ugu badan ugu yaraan afar gobol oo ah guud ahaan Australia oo dhan.

Goorma ayaa la qaban doonaa Aftida Codka Dadka Dhaladaka ah?

Aftida Codka Dadka Dhaladka ah dalka waxaa la qaban doonaa sannadkan xaggiisa dambe.

Su'aashee ayey Afti bixinta Codka Dadka Dhaladka ah weydiin doontaa?

"Sharci la soo jeediyey: in la bedelo Dastuurka si loo aqoonsado Dadkii Koowaad ee Australia iyadoo la sameynayo Codka Aboriginal and Torres Strait Islander. Ma ogoshahay bedelaadan la soo jeediyey?"

Yaa sameeyay macluumaadka kujira warqadan?

Warqadaan xaqiiqda waxaa lagu sameeyey dedaal wada jira Life Without Barriers, Reconciliation Australia, SNAICC – National Voice for our children, the Yes Alliance iyo Polaron Language Services Shirkadaan waxaa loo sameeyey in lagu caawiyo sameynta macluumaad la heli karo ee Codka Dadka dalka loogu yimid ee Baarlamaanka.

Xaggee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

The National Indigenous Australians Agency www.niaa.gov.au
SNAICC National Voice for our Children www.snaicc.org.au
Reconciliation Australia www.reconciliation.org.au
First Peoples Disability Network www.fpdn.org.au
Life Without Barriers www.lwb.org.au
Yes 23 www.yes23.com.au
Polaron www.polaron.com.au
Have Your Say www.haveyoursay.net